# Habka ilma soo-ridida – qaliinka

## Ilma iska-soo ridida qaliinka ahi waa hab aad si ula kac u joojiso uur-qadida

Talaabada ugu horaysaa waa inaad ballan samaysato si aad u hesho talo dhakhtar. La tashigaan dhakhtarku wuxuu kuu sheegi doonaa:

- Ta'kiidinta in habkaani ku haboon kugu haboon yahay
- Sharax habka qaliinka ee ilma iska soo ridida
- U ballaminta ultrasound iyo baaritaan dhiig sida loogu baahan yahay
- Waxaa lagu siin doonaa foomka ka raalinoqoshada si aad u saxiixdo haddaad go'aansatay inaad samayso
- Samaynta ballanta ilma iska soo saarida

Rugaha caafimaadka qaarkood habka ilma iska soo ridida wuxuu dhacaa isku maalinta wada tashiga; kuwa kale, maalin kaleeto.

## Diyaarinta qaliinka ilma-iska-soo ridida

- Sigaar ha cabin, wax ha cunin hana cabin (xataa biyo) ilaa lix saacadood qaliinka ka hor. Taasi waa amaankaaga dartiis markaad lagu suuxiyo.
- Qorshay inaad joogto rugta caafimaadka ugu yaraan dhowr saacadood.
- Keenso:
  - Xafaayadaha fiyadhowrka
  - Warqadaada xawilaada (haddii loo baahan yahay)
  - Kaarkaaga Medicare-ka
  - Kaarka daryeelka caafimaadka (hadday khusayso), iyo
  - Wax kasta oo kale oo rugta caafimaadku codsato.
- Qabanqaabi qof kuu qaada guriga.

## Suuxinta qaliinka ilma-iska-soo ridida

Iyada oo ku xiran rugta caafimaadka, habka suuxintu waxaa laga yaabaa inuu lug ku yeesho:

- Suuxdin guud – ma aad soo jeedo marka hawshu socoto
- Gaaska loo yaqaan nitrous oxide – 'hurdo khaafsanaan ah' (halka aad ogtahay, laakiin aad khaafsan tahay oo degan tahay)
- Suuxdin meel ku kooban – irbada suuxdinta ayaa lagu duraa afka ilma galeenka si looga dhigo mid aan waxba dareemayn, ama
- Suuxdin meeleed oo khaafsanaan ah.

## Habka ilma iska soosaarida qaliinka ah

Ilma iska soosaarida qaliinka ah badankeed waxaa la sameeyaa iyada oo la isticmaalayo habka soo-nuugista ugu badnaana waxay qaadataa 15 daqiiqo.

Habka qaliinku waa sida soo socota:

VICTORIA State Government | Health and Human Services

- Afka ilmagaleenkaaga ayaa tartiib la balaariyaa.
- Tuubo dhuuban ayaa markaas ka dib la gelin doonaa ilmagaleenkaaga.
- Uurka ayaa lagu soo saaraa soo nuugis khafiif ah.
- Aallad la yiraahdo curette ayaa la isticmaalaa si loo hubiyo haddii ilma galeenku eber yahay.

## Ilma iska soo-ridida qaliinka ah ka dib

Si hoos loogu dhigo khatarta infakshanka, laba asbuuc qaliinkaaga ka dib (ama maalma yar ka dib marka dhiigu istaago):

- Biya isku shub halkii aad biya dhexgeli lahayd
- Ka fogow galmoodka
- Ka fogow dabaasha.
- Isticmaal fayadhowr halkii aad isticmaali lahayd taamboni.

## Marka la raadiyo talada dhakhtarka ilma iska soo ridida ka dib

Waxaad la yeellan doontaa ballan soo noqnoqonaysa dhowr asbuuc dhakhtarkaaga.

Arag rugtaada caafimaadka, Dhakhtarka Guud ama qaybta Xaalladaha dedgegta ah ee Isbitaalka isla markiiba haddii:

- dhiig baxaagu noqdo mid mid dedgeg oo tira-dhaaf ah
- aad yeellato xumad
- aad ku yeellato calool majiir ama calool xanuun qaybta hoose ee caloosha.

## Dhibaatooyinka iyo caqabadaha ilma iska soo ridida qaliinka ah

Caqabada badanaa  ahaayeen ma dhacaan laakiin laakiin waxay dhacaan ilaa boqolkiiba saddex qaliimada ilma iska soosaarida. Qaliinka waxaa la sameeyaa saddexda bilood oo ugu horreeya, taas oo ah xilliyada la sameeyo qaliimada ilma iska soo ridida badankood, waxayna yeeshaan qabado aad u yar.

**Caqabadaha aadka u xun ee caafimaad ee ilma iska soo ridida aad ayuu u yar yahay, laakiin waxaa ka mid noqon kara kuwa soo socda:**

| Caqabadaha | Astaamaha ama dhibta ka dhalan karta | Maxaa loo baahan yahay in wax laga qabto |
|---|---|---|
| **Dhiigbax** (dhiigbax aad u weni wuxuu muujin karaa in ilma iska soo saaridii aanay dhamaystirnayn) | • Dhiig bax buuxiya in ka badan laba faya-dhowr saacadii ilaa labadii saacadood.<br>• Soo bixitaanka dhiig xinjiraysan, oo le'eg liin dhanaan yar.<br>• Dareemida daciifnimo ama suuxid. | • Degdeg u raadi daryeel caafimaad.<br>• Wac 000 si aad u hesho ambalansi oo aad u tagto qaybta xaalladaha degdegta ah ee dhakhtarka kuugu (adigu gaariga ha wadin, qof ha ku kaxeeyo).<br>• Waxaa laga yaabaa in ilma galeenka wax laga soo nuugo iyada oo la isticmaalayo curettage.<br>• Waxaa laga yaabaa in dhiig lagugu shubo (arrintani badanaa ma dhacdo). |
| **Infakshan:** | Dhici kara: | • Raadi tala dhakhtar oo degdeg ah |

| Caqabadaha | Astaamaha ama dhibta ka dhalan karta | Maxaa loo baahan yahay in wax laga qabto |
|---|---|---|
| | • Majiirasho ama callool xanuun<br>• Waxyaalla siilka ka soo baxa oo aan caadi ahayn<br>• qandho<br>• dhiigbax xoog leh<br>• daal<br>• shuban<br>• hunqaaco. | • Tag rugtaada caafimaadka, Dhakhtarkaaga guud ama qaybta xaalladaha degdegta ah ee isbitaalka si laguu siiyo daawada antibaayootikis. |
| **dhaawac ku dhaca ilmagaleenka**<br>Tani waa mid aan badanaa dhicin sababtoo ah ilma iska-soosaarida waxaa fuliya dhakhtar khibrad leh | • Dhakhtarka ayaa aqoonsanaya. | • Dhakhtarka ayaa aqoonsanaya oo daawaynaya isla markiiba |
| **dhaawaca ama daciifinta ilma galeenka**<br>arrintani waa mid aan badanaa dhicin sababtoo ah qaliimada ilma iska soo ridida waxaa badanaa sameeya dhakhtar aqoon u leh | • Tani waxay dhalin kartaa dhibaatooyin uurka la xiriira mustaqbilka. | • Uurkaaga mustaqbilka dhakhtarkaaga dumarka ayaa ku siin doona talo |

## Macluumaad intaas ka badan

Xaashidaani waa mid ka mid ah saddexda xaashiyadood ee ku saabsan ilma iska soosaarida ee Tusaha Tarjumaadaha Caafimaadka. Waxaad kaloo aragtaa:

- Habka Ilma iska soosaarida – daawada.
- Ilma soo ridida.

Waxaa ansixisay oo daabacday Xukuumada Australia, 1 Treasury Place, Melbourne.
© Dawlad Goboleedka Fiktooriya, Wasaarada Caafimaadka iyo Adeegyada Aadamiga, Janaayo, 2019
Waxaa laga hellaa <http://healthtranslations.vic.gov.au/>